Xubnaha milyanka iyo badhka ah macnahoodu waxaa weeye natiijooyinka ay helaan!

Saddex milyan oo guryo kireysteyaal ayaa ku nool Iswiidhan. Haddii xaaladuhu ku xumaadaan kireysteyaasha guryaha, dad aad u badan ayey saameyn doontaa. Taasina waa sababta Hyresgästföreningen ugu shaqeyso badbaadinta iyo kor u qaadista xuquuqda aad leedihiin iyo tayada guriyeyntiinna.

Saameyn ayaan ku leenahay siyaasadda guriyeynta ee Iswiidhan, waxaana kamid ah ka shaqeynta in laga hor tago iibinta shirkadaha guriyeynta dawladda hoose. Kuwaasi waa inay hawsha u qabtaan si ay ku jirto danaha degenayashoodu.

Waxaannu sidoo kale dood ka wadnaa doodda ku saabsan guryo la'aanta iyo qiimeyaasha sare ee dhismaha. Waxaa suurta gal ah in la dhiso deegaan macquul qiimihiisu yahay oo la kireysto!

Isticmaal xubinnimadaada!

Waxaannu qabannaa wada xaajoodyo isla markaana ka talo bixinnaa arrimo heshiisyada guryo degista ah. Waxaan dhibnaa taageero sharci, gacanna ka geysannaa haddii aad dooneyso inaad dhex gal ku sameysid arrimaha guriyeynta ee ku aaddan halka aad ku nooshahay, isla markaana nalaka helaa macluumaad ku saabsan guryo degista iyo tababarka. Waxaad heli doontaa jaraa'idkayaga, adeegyada xubinnimada kana helaysaa barta internetka, waxyaabaha loo hayo xubnaha iyo waxyaabo badan oo dhinac yaal.

Ku tasho inaad sameysatid sidi aad xubin uga noqon laheyd Hyresgästföreningen. Maxaad sugeysaa? Na soo wac ama booqo www.hyresgastforeningen.se.

Foto: Elias Larsson

Xajmiga aannu leenahay waa itaalkaaga!

Hyresgästföreningen waxay haysataa xubno kor u dhaafaya milyan iyo badh. Taana macnaheedu waxaa weeye in aannu ku filan nahay inaan saameyn ku yeelan karno siyaasadda guriyeynta ee Iswiidhan.

Waxay sidoo kale la macne tahay in aannu leenahay urur khibrad iyo xirfad aqooneed u leh ka talo bixinta wax kastoo ku lug leh baahiyahaaga guriyeed.

Xubinnimadayada ballaaranina sidoo kale macnaheedu waxaa weeye in aannu dhiibi karno waxtarro badan oo xubin noqoshada ah, sida caymiska guryaha, tusaale ahaan.

Hyresgästföreningen

www.hyresgastforeningen.se

2007 Somaliska

Hyresgästföreningen

Ma waxaad tahay qof guri kiro ugu jira?

KU SOO BIR HYRESGÄSTFÖRENINGEN!

Fikraddaada ayaa loo baahan yahay waxna tareysa!

Iyadoo ay taageero kula garab taagan tahay Hyresgästföreningen, waxaad dhexgal ku sameyn kartaa isla markaana aad si muuqata dabakhaad ugu sameyn kartaa wax kasta oo ku shuqul leh meesha aad ku nooshahay. Wax kasta ha noqotee laga soo bilaabo dhibaatooyinka kaa haysta qolka dharka lagu dhaqo ilaa iyo heshiiska guriga aad ku deggan tahay markii lagaa joojiyo. Arrimha iska yar yar si toos ah ayaan taleefan ahaan ugu xallinaa laakiin xaaladaha qaar maxkamadda inaad aadno ayey nagu khasabtaa si aan u kala saarno xuquuqaha aad leedahay.

Dadka qaarba qarka kale si bay uga duwan yihiin marka loo eego arrimaha heshiiska guri degista, muhiimaddana u kala siiyaan. Qaarkood, arrinta ugu muhiimsani waa in ay helaan meel ay ku noolaadaan oo ay ku qanacsan yihiin, halka kuwa kalana diiradda si aad ah ay ugu saaraan nabadgelyada iyo ammaanka. Haddii haysatid carruur yar yar, daarad guriga ka baxsan oo ay kuugu ciyaaraan waxay noqon kartaa wax loo baahan yahay.

Fikraddaada ayaa loo baahan yahay waxna tareysa!



Ma dooneysaa inaad bixisid ijaar macquul ah?
Ijaarka lacageed ee bixinaysaa waa inuu noqdaa mid macquul ah oo xiriir la leh heerka iyo tayada u yaal falaadyada la gedo. Mid kamid ah shaqooyinkayaga ugu muhiimsani waa in aan kuu metalno wada xaajoodyada kirada lacageed ee guryaha. Iyo in aan ku khasabno milkiileyaasha guryuhu inay dayac tiraan dibna u hagaajiyaan dhismeyaashooda.

Ma u baahan tahay talo bixin xagga sharciga ah?
Hyresgästföreningen waxay leedahay garyaqaanno aqoon u leh Xeerka Guri Degista Ijaarka ah dhinac kasta marka laga eego. Sanad walba waxaannu taageero iyo adeeg u fidinnaa kumanaan xubnahayaga ka tirsan.

Ma dooneysaa inaad ogaato xuquuqaha aad leedahay?
Maadaama aad tahay qof guri ijaar ugu jira waxaad leedahay xuquuqo waajibaadyo. Haddii aad dooneyso inaad ogaatid waxa ay yihiin kuwaasi, waxaan talo bixin kaaga siin kartaa innagoo taleefan ku wada hadleyna ama aannu isugu nimaanno fool ka fool. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa adeegga xubnaha naga diiwaan gashan kana isticmaali kareysaa barta internetkayaga.

Ma dooneysaa inaad wax badan ka ogaato waxyaabaha ku saabsan arrimaha guryaha?
Xubnuhu si toos ah ayey u helaan macluumaadka – iyadoo ay ka helaan jaraa'idkayaga iyo barta internetka.

Ma dooneysaa inaad wax ka beddesho halka aad ku nooshahay?
Iyadoo ay taageero kula garab taagan tahay Hyresgästföreningen, waad ka shaqeyn kartaa waxna ka hagaajin kartaa xaaladaha goobta aad deggan tahay.

Bartayada internetku waxay u suurta gelisaa xubnaha naga diiwaan gashan adeegyada, macluumaadka iyo wararka ku saabsan nolosha qofka guriga kirada ugu jira. Su'aalo waad soo jeedin kartaa, ka faa'iideyso waxtarrada laga helo xubinnimadaada, kala soo bax foomamka sii kireynta iyo waxyaabahaka kale ee badan.

www.hyresgastforeningen.se

Haddii aadan xubin buuxda aheyn

Waxaa lagaa doonayaa inaad xuquuqahaaga baadi goobatid adiga naftaadu. Adiga yaa lagaa doonayaa inaad hor geysato kiiskaaga maxkamadaha hortooda. Adiga yaa lagaa doonayaa inaad iska bixisid qiimayaasha lacageed ee ku baxa garyaqaanka. Hadana adigaa lagaa rabaa inaad la xaajeysatid milkiilaha guriga aad deggan tahay.

Maxaad ugu soo biiri la'dahay Hyresgästföreningen. Iyadaa u qalantee.